



Gacaliye Waalid ama Wakiil

Sharciigii dhawaa waxa uu xoojiyey dammaanad qaadka Wax-akhrinta Fasalka Saddexaad ee Ohio (Ohio Third Grade Reading Guarantee) si uu xoogga u saaro barista wax-akhrinta iyo faragelinta fasallada ah billowga hore. Iyada oo loo marayo dadaalkan, degmooyinka dugsiyadu waxa looga baahan yahay inay ogaadaan cilladaha wax-akhriska iyaga oo maamulaya qiimaynta ogaanshaha dhammaan ardayda dhigata dugsiga barbaarinta (kindergarten) ee bisha Noofeembar 1- deeda, iyo ardayda fasallada koowaad, labaad ama saddexaad ee bisha Sibteembar 30-keeda. Dugsiyada Magaalada Columbus waxay maamulaan qiimayn la yiraahdo i-Ready, imtixaanka kombuyuutar la qabsiga, imtixaan si gaar ah loo maamulo oo loogu talagalay in lagu qiimeeyo xirfadaha akhris-qoritaanka ee ah bilowga hore.

Natiijooyinka ardayda ee qiimaynta la yiraahdo i-Ready ayaa la qeexay oo loo kala saaray haddii wadadii si saxda ahayd loo raad-raacay ama aan loo raad-raacin. Ardayga helaya u-magacaabista wadada saxda ah ee loo raad-raaco waa arday kasta oo buuxiya buundada saxda ah ee looga baahan yahay fasalka koowaad ee ah 378 ama fasalka labaad ee ah 440. Fasalka saddexaad waa mid u gaar ah in ardaydu ay keenaan buundada ah 700 ee dayrtooda ama gu'ga ee Imtixaanka Gobolka Ohio (Ohio State Test) iyo 50 buundo ama ka sareeysa Heerka Wax-akhriska Ingiriisiga/Farshaxanka Luuqadda marka loo eego heerka gobolka si ilmahaagu uu ugu socdo wadada raad-raaca ama aanu ugu socon. Eeg mid ka mid ah labada sababood ee hoos lagu hubiyay.

Waxaad haysaa warqaddan sababtoo ah iyadoo lagu salaynayo qiimaynta la yiraahdo i-Ready:

Ilmahaaga waxa loo aqoonsaday in aanu ku jirin raad-raaciisa/raad-raaceeda goobta wax-akhrinta ee heerka fasalka uu hadda joogo. Qorshahan waxaa loo sameeyay si loo diiwaan geliyo horumarka ilmahaaga si loo hubiyo ku sii socoshada koritaanka akhris-qorista iyo guusha.

Faah-faahinta/Sharaxaada adeegyada hadda ardayga loo fidiyo waa sidan soo socota:

	90 daqiiqo oo ah Barashada Akhriska		Waxbaridda Koox Yar
	Barista/Umeerinta ama Hagidda		Kale:

Faah-faahinta/Sharaxaada adeegyada dheeriga ah ee la soo jeediyay waa sida soo socota:

	120 daqiiqo oo ah Barashada Akhriska		Faragelinta Koox Yar
	Fursadaha Waxbarasho ee La Dheereeyay (ELO)		Barista/Umeerinta ama Hagidda
			Kale:

Dammaanad qaadka Akhriska ee Fasalka Saddexaad (Third Grade Reading Guarantee) waxa kale oo uu uga baahan yahay dugsiyadu in ay horumariyaan Qorshaha Hagaajinta iyo Korjoogteynta Akhriska ee ardayda loo aqoonsaday in aanay ku socon raad-raac ku salaysan qiimaynta la yiraahdo i-Ready.

Had iyo jeer waxay ahayd hadafka Dugsiyada Magaalada Columbus si ay u daboolaan baahiyaha waxbarasho ee ardaydeena. Sidaa awgeed, waa lama huraan inaan sii wadno inaan u wada shaqayno si wada jir ah si loo xaqiijiyo guusha ardaydeena.

Fadlan ha ka waaban inaad si toos ah ula xiriirto macalinka ilmahaaga ama xafiiskayga haddii aad qabtid wax su'aalo ah ama walaac dheeraad ah.

Si daacad ah,

Maamulaha